

Warbixin ku saabsan waajibaadka barashada noorwiiijiga iyo culuunta bulshada

Waajibaadka barashada noorwiiijiga iyo culuunta bulshada

Waxaa lagu siiyay ruqsad aad ku joogto noorwey taas oo u ah aasaas inaad codsato

- sharciga deggenaansho oo daa'im ah, iyo/ama
- jinsiyada

Si lagu siiyo sharciga degganaanshaha daa'imka ah ama jinsiyada, waxaa waajib kugu ah inaad dhameysato 300 saacadood oo lagu barrayo

- Af noorwiiijiga (250 saacadood), iyo
- Culuunta bulshada (50 saacadood)

Waajibaadkan kuma saara hadaad jirto 55 ama aad ka weyntahay xiliga aad codsiga soo gudbineyso.

Waa inaad adiga iskabixisaa waxbarashadaas.

Waxaad codsankartaa in laga qaado waajibaadka waxbarida hadaad

- caddayn karto inaad u leedahay aqoon kugu filan luuqada noorwiiijiga ah ama tan saamiga ah, ama
- hadey jirto xaalad gaara oo caafimaad ama sababo kale oo adkeynaya waxbarashada

Warbixin faa'iido leh

Waa inaad adiga la xiriirtaa goobta waxbarashada dadka waaweyn ee gobolka aad ka diwaangashantahay , si aad u codsato waxbarashada, ama hadaad dooneyso inaad codsato si lagaaga qaado waajibka waxbarashadaas. Haddaad qabtid su'aal ama aad u baahantahay warbixin ku saabsan waqtiyada kama dambeynta ah iyo xuquuqaha, la xiriir goobta waxbarashada dadka waaweyn.

Waxaad sidoo kale warbixin ka heli kartaa shabakadahan; www.imdi.no iyo www.udi.no.